

# Jeermis Ku dilista iyo Ku Nadiifinta Daawada Wax Cadaysa

## Tilmaamaha Iskudarka Dareerayaasha Wax Cadeeya ee Goobaha Daryeelka Carruurta iyo meelaha Lamidka ah

### Tilmaamaha Diyaar Garoowga

**Qaso dareeraha** wax cadeeya oo cusub maalin kasta adoo ku qasaaya meel hawo fiican leh oo ka fog carruurta.

**Ku qor dusha** dhallooyinka kiimikada wax cadaysa ay ku jirto mawduucyada, cabirka, iyo taariikhda la qasay.

**Adeegso biyo qaboow.** Markasta cadeeye kudar biyaha qaboow, Haku DARIN biyaha

### Dareeraha Jeermis Dilaha

Waxaa loo adeegsanayaa miisaska ilmaha xafaayada looga badelo, siimanka farxalka, musqulaha (ayna ku jirana baafafka musqusha, fadiiyada musqusha, wareegyada tababarka, saabuun firdhiyaasha, kuraasta caaga ah), gacanka albaabka iyo qaanada, iwm.

#### Adeegsiga cadeeye leh dareeaha:

| Biyo     | 2.75 %             | 5.25-6.25 % | 7.5-8.25 % |
|----------|--------------------|-------------|------------|
| 1 Galaan | 1/3 koob + 1 Qaado | 3 Qaado     | 2 Qaado    |
| 1 Quart  | 1 ½ Qaado          | 2 ¼ Qaado   | 1 ½ Qaado  |

### Dareeraha Jeermis Nadiifiyaha

Si aad ugu adeegsato weelasha wax lagu cuno meelaha cuntadu taabato, miisaska wax lagu qaso, rakooyinka kuraasta kore, geesaha sariirta ilmaha iyo joodarida, boonbalayaasha, cinjirka ilmuhu nuugo, dhulka, sijaayada lagu seexo, iwm.

#### Adeegsiga cadeeye leh dareeaha:

| Biyo     | 2.75 %  | 5.25-6.25 % | 7.5-8.25 % |
|----------|---------|-------------|------------|
| 1 Galaan | 1 Qaado | 2 Qaado     | 1 Qaado    |
| 1 Quart  | 1 Qaado | ½ Qaado     | ¼ Qaado    |

Jeermis ka dilida meelaha qalafsan ee aan cuntada la saarin ayaa lagu gaari karaa dareeaha ay ku jirto 600 oo qayb halkii milyanba (ppm) oo cadeeyaha koloriinta ah. Si loo fududeeyo cabirka, awoodaha ku qoran shaxdaan ayaa matalaaya ku dhawaad 600-800 ppm cadeeye ah si loogu sameeyo jeermis dilid, ku dhawaad 100 ppm oo nadiifiye ah. Tijaabada koloriinta ayaa u dhaxaysa heerka cabirka oo 0-800 ppm ah ama ka badan ayaa sidoo kale loo adeegsan karaa in la go'aansho awooda dareeraha.

**La xariir maamulka caafimaadka ee deegaankaaga** si ay kuu siiyaan tilmaamo dheeraad ah oo ku aadan nadiifinta iyo jeermis dilida haddii cudur ama ilmo aragtay la oggaado inay cudur ka dhaliyeen barnaamijkaaga.

**Adeegso keliya cadeeyaha aan la sumayn** ee qoraaya awooda boqolkiiba (%) oo ku qoran xaashida shirkada samaysay ku dhajisay. Ka akhri cabirka dhalada cadeeyaha si aad u go'aamiso awooda cadeeyaha. Tusale, Sodium Hypochlorite...6.25% ama 8.25%.

Shaxdaan waxaa abuuray Kooxda Shaqada ee Jeermis Dilista oo ay hogaanka u hayso Washington State Department of Health. (Waxda Gobalka Washington uqaabilsan Caafimaadka). Kooxda shaqada ayaa ka kooban shaqaale ka socda Department of Early Learning (Waxda Waxbarashada Dhallaanka), Snohomish Health District (Caafimaadka Degmada ee Snohomish), Local Hazardous Waste Management Program in King County (Barnaamijka Maamulka Wasaqa Waxyaabaha Khatarta ku ah Deegaanka ee Degmada King), Washington State Department of Ecology (Waxda Gobalka Washington uqaabilsan Noolaha), Coalition for Safety and Health in Early Learning (Isbahaysiga Badqabka iyo Caafimaadka Waxbarashada Dhallaanka), iyo Washington State Department of Health (Waxda Gobalka Washington uqaabilsan Caafimaadka). Waxaa sawirada lagasoo xigtay: **DOH Publication 970-216 Janaayo 2015.** (<http://here.doh.wa.gov/materials/quidelines-for-bleach-solutions>)





Read for additional precautionary labeling.  
**ACTIVE INGREDIENT:**  
Sodium Hypochlorite 7.52%  
**OTHER INGREDIENTS:** 92.48%  
**NET WTAL:** 100.00%  
(Yields 7.55% available chlorine)  
**INGREDIENTS LISTING**

